Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari

وِزَارَةُ الــتَّخْطِيطِ وَالــتَّنْــمِــيَــةِ وَالــتَّعَــاوُنِ الــدَّوْلِــيِّ لِــدَوْلَــةِ شَــمَــالِ شَــرْقِ الــصُّــومَــالِ

Ministry of Planning, Development and International Cooperation, Northeastern Somalia

Xafiiska Agaasimaha Guud | Office of the Director General

مــكــتــب الــمديــر الــعام



Warbixinta Waxqabadka Xafiiska Agaasimaha Guud 2024– 2026

2024-2026 Office of the Director General Performance Report



22

September 2026

Qorsheyn Hufan ● Waxqabad Muuqda ● Horumar Waara

Website: mopdic-ne.so | Social media: — @MoPDIC

SSC-Khaatumo - Waqooyi Bari

22 Sep 2024 - 22 Sep 2026

Laba sano ma aha oo keliya waqti la tiriyey; waa waqti shaqo lagu cabbiro, waayo-aragnimo lagu dhiso, qorshayaal lagu abuuro, hay’ad lagu xoojiyo, iyo taariikh lagu reebo.

Buuggani, sidaas darteed, ma aha oo keliya ururin warbixino iyo qoraallo ah; waa xusuus-qor ka tarjumaya laba sano oo ka mid ah safarkii Wasaaradda Qorshaynta, iyo raadkii shaqo ee ka soo baxay xafiiska Agaasimaha Guud intii u dhaxaysay 22-ka Sebtembar 2024 iyo 22-ka Sebtembar 2026.

Osman Aden Huusein



ARAR

22-ka Sebtembar 2024 waxay ahayd maalin taariikhi ah oo bilow u noqotay socdaal shaqo oo ku suntanaa adeeg, masuuliyad iyo dadaal joogto ah. Xilligaas oo lagu jiray xilligii ku-meel-gaadhka ahaa ee Dowladda SSC-Khaatumo, Madaxweynaha Dowladda SSC-Khaatumo, Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali, ayaa ii magacaabay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga ah ee SSC-Khaatumo.

Maalintaas waxa aan bilaabay masuuliyad aan u arkayay in ay ka weyn tahay xil iyo jago; waxay ahayd waajib qaran oo ku aaddanaa qorshaynta, horumarinta, isku-xidhka hay'adaha iyo ka shaqaynta himilooyinka dowladnimo. Muddo hal sano, toddoba bilood iyo saddex iyo toban maalmood ah, waxa aan xilkaas ku gudanay shaqooyin, qorshayaal, warbixinno iyo hawlo kala duwan oo qayb ka ahaa dhismaha iyo horumarinta hay'adaha dowladeed.

Markii la soo dhammeystiray SSC-Khaatumo lana guda galay marxaladda cusub ee loo guuray Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya, waxaa billowday bog cusub oo taariikhi ah. Madaxweynaha Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya, Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali, ayaa 5-ta May 2026 mar kale ii igmaday in aan sii wado masuuliyadda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya.

Xilkan cusub waxa uu noqday sii-socodkii hawshii hore, balse sidoo kale waxa uu furay marxalad cusub oo leh himilooyin, qorshayaal iyo masuuliyado ka sii ballaadhan. Waxa uu ahaa fursad lagu sii xoojinayo shaqadii la soo bilaabay, laguna dhisayo hay'ad qorshayn oo awood u leh in ay hagto qorshayaasha horumarineed, isku dubbariddo dadaallada hay'adaha dowladda, isla markaana door muuqda ka qaadato jihaynta mustaqbalka horumarineed ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22-ka Sebtembar 2026, waxa ay ku beegan tahay laba sano oo buuxa laga soo bilaabo maalintii ugu horreysay ee aan ka shaqo bilownay Wasaaradda Qorshaynta. Waa laba sano oo ay ku duugan yihiin waayo-aragnimo, hawl, dadaal, caqabado, guulo, qorshayaal iyo xusuuso badan oo ka mid ah socdaalkii hay'adeed ee Wasaaradda.

Buuggani waxa uu soo koobayaa labadaas sano ee shaqada, hawlaha, warbixinnada, qorshayaasha iyo dhacdooyinkii muhiimka ahaa ee ka soo baxay xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga ah.

Waxa uu sidoo kale xambaarsan yahay raad-raac kooban oo muujinaya marxaladihii kala duwanaa ee Wasaaraddu soo martay, laga soo bilaabo xilligii SSC-Khaatumo, ilaa marxaladda cusub ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya.

Laba sano ma aha oo keliya waqti la tiriyey; waa waqti shaqo lagu cabbiro, waayo-aragnimo lagu dhiso, qorshayaal lagu abuuro, hay'ad lagu xoojiyo, iyo taariikh lagu reebo.

Buuggani, sidaas darteed, ma aha oo keliya ururin warbixino iyo qoraallo ah; waa xusuus-qor ka tarjumaya laba sano oo ka mid ah safarkii Wasaaradda Qorshaynta, iyo raadkii shaqo ee ka soo baxay xafiiska Agaasimaha Guud intii u dhaxaysay 22-ka Sebtembar 2024 iyo 22-ka Sebtembar 2026.



Xil La Wareegistii Agaasimaha Guud

Laascaanood: 29/09/2024 Saaka oo Axad ahayd waxaa qabsoontay munaasabadda ay xilka agaasimaha guud kula kala wareegayeen ku-simihii agaasimaha guud ee wasaaradda qorshaynta Mudane Maxamed Cabdirahmaan Cali (ruush) iyo agaasimaha cusub ee wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen.

Munaasabadda Xil-wareejinta Agaasimaha Guud ee Wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah ee SSC-Khaatumo waxaa kasoo qayb galay masuuliyinta dowladda sida: Wasiiro, la taliyaha arrimaha guudaha federaalka iyo dib u heshiisiinta, Agaasimayaal guud, Agaasime waaxeedyada wasaaraddaha Maamulka SSC-Khaatumo iyo Guddoomiyaha Gobolka Sool. Kuwaasi oo dhamaan si isku mid duco iyo dardaar usoo jeediyay Agaasimaha Guud, allena uga baryay inuu masuuliyadaa u fududeeyo.



KULANKA TODDOBAADLAHA

Laascaanood: 02/10/2024 Waxa hoolka shirarka ee wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah ee SSC-Khaatumo ka qabsoomay kulanka toddobaad laha ah ee WQHIC.

Kulankaas oo uu guddoominayay Wasiirka wasaaraddu Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye, ayaa ujeedkiisu ahaa Dardar gelinta shaqooyinka wasaaradda iyo dhegaysiga waxqabadyadii u qabsoomay waaxyaha wasaaradda iyo qorshayaasha hortabinta u leh.

Wasiirka & Agaasimaha guud ee WQHIC ayaa ku bogaadiyey agaasime waaxeedyada shaqooyinka wacan ee u qabsoomay muddadii koobnayd ee ay shaqaynayeen, sidoo kalena ku amaanay qorshayaashooda hortabinta uleh.



Tababarka Xeeladaha Qorshaynta Waaxyaha Qorshaynta

Laascaanood: 5-10-2024:- Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee SSC-Khaatumo ayaa saaka tababar u qabatay agaasimayaasha waaxyaha qorshaynta ee wasaaradaha Kalduwan ee Maamulka SSC-Khaatumo.

Tababarkan oo ku saabsanaa kor u qaadista aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha waaxyaha qorshaynta wasaaraddaha (Public sector planning & Strategic planning models)

Agaasimaha guud ee WQHIC Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa daahfuray tababarka isaga oo kula dardaarmay shaqalaha in ay aqoonta halkan ka qaateen kula laabtaan wasaaradihii ay ka yimaadeen si loo diyaariyo qorshayaasha Maamulka SSC-Khaatumo hortabinta u leh.



Kulanka Wasaaradda Qorshaynta iyo Guddiga Gaadiidlayda Laanguruusalada.

Laascaanod: 06/10/2024:- Waxaa qabsoomay kulan dhexmaray Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah iyo midowga gaadiidlayda laanguruusalada ee deeggaanka SSC-Khaatumo. Agaasimaha guud ee Wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen oo ay weheliyaan hawl wadeenada wasaaradda ayaa kulan muhiima la qaatay midowga gaadiidlayda laanguruusalada, kulankaas oo daarnaa isbarasho, kala warqaadasho iyo xoojinta shaqooyinka ka dhexeeya wasaaradda iyo gaadiidlayda. Iyagoo sheegay inay si dhow ula shaqaynayaan guud ahaan Maamulka SSC-Khaatumo, soona badhigay talooyin iyo dhiirigelin ku saabsan hawlaha hortabinta u leh Maamulka SSC-Khaatumo.



KULAN KORMEER SHAQO

Laascaanood: 8/October/2024:- Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah muddane Axmed Diiriye, oo uu weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda muddane Cismaan Xaaji Aadan iyo hawladeenada wasaaradda ayaa kusoo dhaweeyey xarunta wasaaradda guddiga Maaliyadda, Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Golaha Baarlamaanka Maamulka SSC-Khaatumo kuwaas oo kormeer shaqo ku yimi wasaaradda.

Wasiirka Wasaaradda iyo Agaasimaha Guud ayaa warbixin faahfaahsan ka siiyay hawlaha hortabinta u leh wasaaradda iyo waxyaalaha u qabsoomay mudadii ay xilka hayeen guddiga, sidoo kale waxa ay ka warbixiyeen mashaariida hada ka socota deeggaanka SSC-Khaatumo, iyo kuwa la rajeynayo in la bilaabo dhawaan.



KULANKA TODDOBAADLAHA AH EE WASAARADDA

Laascaanood: 09/10/2024:- Waxa hoolka shirarka ee wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah ee SSC-Khaatumo ka qabsoomay kulanka toddobaad laha ah ee WQHIC.

Kulankaas oo uu guddoominayay Wasiirka wasaaraddu Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye, ayaa ujeedkiisu ahaa Dardar gelinta shaqooyinka wasaaradda iyo soo bandhigis ay waaxyuhu soo bandhigayeen wixii uga qabsoomay qorshayaashii toddobaadkii lasoo dhaafay u degsanaa. Wasiirka & Agaasimaha guud ee WQHIC ayaa ku bogaadiyey agaasime waaxeedyada shaqooyinka wacan ee u qabsoomay toddobaadkii lasoo dhaafay, sidoo kalena ku ammaanay qorshayaashooda hortabinta uleh.



GUDBINTA BAAHIYAHA BEERALEYDA OO AY WASAARADDA BEERUHU SOO GUDBISAY.

aascaanood:13/0ctober/2024:- Shir ay soo qaban qaabisay Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ayna qabatay Hay'adda ICRC ayna kasoo qayb-galeen Wasaradda Beeraha ee SSC-Khaatumo ayaa saaka ka qabsoomay magaalada laascanood.

Shirkan oo uu furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah Mudane Cismaan Xaaji Aadan Xuseen ayaa u jeedkiisu ahaa isku xidhka Hay'addaha caalamiga ah, Wasaaradaha Maamulka, iyo sidoo kale soo gudbinta baahiyaha beeraleyda oo ay Wasaaradda Beeruhu soo gudbisay.

Agaasimaha ayaa kula dardaarmay Beeraleydda, ururka isku tashi Bulshaddo iyo qaybaha kale ee ka socday arrimaha bulshadda in si wanaagsan u soo bandhigaan baahiyaha bulshadda ee hortabinta iyo horumarinta u leh Maamulka SSC-Khaatumo.



KULANKA TODOBAADLAHA WASAARADDA

Laascaanood: 16/10/2024 :- Waxa hoolka shirarka ee wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah ee SSC-Khaatumo ka qabsoomay kulankii toddobaad laha ah ee WQHIC.

Kulankaas oo uu guddoominayay Agaasimaha Guud Mudane Osman Haji , ayaa ujeedkiisu ahaa Dardar gelinta shaqooyinka wasaaradda iyo soo bandhigis ay waaxyuhu soo bandhigayeen wixii uga qabsoomay qorshayaashii toddobaadkii lasoo dhaafay u degsanaa.

Agaasimaha Guud ee WQHIC ayaa ku bogaadiyey agaasime waaxeedyada shaqooyinka wacan ee u qabsoomay toddobaadkii lasoo dhaafay, sidoo kalena ku ammaanay qorshayaashooda hortabinta u leh wasaaradda iyo maamulka SSC-Khaatumo ee ay soo qabteen toddobadakii tagay.



DEJINTA QORSHAYAASHA MAAMULKA SSC KHAATUMO "NTP"

Laascaanood: 19/October/2024:- Wasaaradda Qorshaynta Maamulka SSC-Khaatumo ayaa qabatay kulan ay iskugu yimaadeen Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Maamulka SSC-Khaatumo kulan kaas oo ahaa mid hor dhac u ah dejinta qorshayaasha maamul SSC-Khaatumo ee lagaga qayb qaadanayo qorshaha heer qaran (National Transformation Plan).

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Mudane Cismaan Aadan Xuseen oo shirka guddoominayay ayaa faahfaahin kabixiyay muhiimadda ay leedahay kaqayb galka qorshaha qaran (NTP)isaga oo sheegay in aay tahay markii ugu horreysa ee maamulka SSC-Khaatumo ka mid noqodo qorshaha qaranka Soomaaliya .



QORISTA QORSHAHA ISBEDELKA QARANKA "NTP" 2025-2029

MUQDISHO 21/10/2024: Waxaa Magaalada Muqdisho ka furmay shir u dhexeeya Wasaaradda Qorshaynta Maamulka SSC-khaatumo iyo wasaaradda qorshaynta Dawladda federaalka ee Soomaliya.

Shirkaas oo ujeedkiisu yahay ka qayb qaadashada Qorista Qorshaha Isbeddelka Qaranka (National Transformational planning) ee shanta sano ee soo socota iyo Gudbinta Qorshayasha hortabinta u leh Maamulka SSC-Khaatumo

Masuuliyiinta ka socday wasaaradda Qorshaynta SSC-Khaatumo ayaa ka la ahaa Wasiirka Wasaaradda Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye , Agaasimaha Guud ee wasaaradda mudane Cismaan Aadan xuseen iyo Agaasimaha waaxda qorshaynta Mudane Maxamed Cabdiraxmaan ruush iyo la taliyaal sare oo Wasaaradda ka tirsan.



SOO BANDHIGISTA QORSHAYAASHA HORTEBINTA ULEH SSC-KHAATUMO.

Muqdisho: 22/10/2024: Waxaa saaka Magaalada Muqdisho kusoo dhammaaday Qorista Qorshayaasha Qaran (NTP) ee Maamulka SSC-Khaatumo oo ay muddo laba maalmood ah Wasaaradda Qorshaynta SSC-Khaatumo ay ka shaqaynaysay iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Qorshaynta ee heer Fedaraal.

Agaasimaga Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa saaka ka hor jeediyay Presentation ah Qorshayaasha shanta sano ee soo socota ee Maamulka SSC-Khaatumo.



BOOQASHADA SHEYBAADHADA QORSHAHA ISBEDELKA QARAN (QIQ: 2025-2029)

Muqdisho: 24/10/2024:- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Maamulka SSC-Khaatumo Mudane Cismaan Aadan Xuseen oo uu weheliyo agaasimaha waaxda qorshaynta iyo siyaasadda Mudane Maxamed Cabdiraxmaan Ruush ayaa booqday xarunta sheybaadhada Qorshaha Isbedelka Qaran (QIQ) oo ay ka socdaan lafaguridda, iyo isku dubaridida hawla qorshaha isbeddelka qaranka.

Agaasimaha Guud ayaa sidoo kale warbixino ka dhegeystay Khubaradda ka socday Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo kuwa caalamiga ah ee gacanta ku haya qorshaha isbeddelka qaranka Shanta sannadood ee soo socota.



KULANKA WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HAY'ADAHA NABADGELYADDA EE MAAMULKA

Laascaanood: 12/November/2024:-Waxa qabsoomay kulan muhiim ah oo uu Shir-gudoominayay Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye oo uu weheliyo Agaasimaha Guud Wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen iyo Agaasimaha waaxda Qorshaynta muddane Mohamed Cabdiraxmaan,Taliyaha Ciidanka Police-ka Mudane Siyaad Maxamuud Cabdiraxmaan, Taliye kuxigeenka Ciidanka Mudane Cismaan Ibraahim Ducaale, iyo laamaha saraakiisha qayb kamida dagmooyinka maamulka ayaa goobjoog ahaa. . Kulankaas oo u dhexeeyay Wasaaradda Qorshaynta iyo Hay'adaha Amaanka ee Maamulka SSC-khaatumo, waxaanna looga hadlayay sidii loo ilaalin lahaa badqabka Hay'adaha,iyo sidii loo xoojin lahaa iskaashiga iyo wada-shaqeynta hay’adaha kala duwan ee ku lugta leh nabadgelyadda iyo badqabka Hay'adda ka shaqeeya maamulka SSC-Khaatumo.



XAQIIJINTA QORSHIHII UU MAAMULKU USOO GUDBIYEY SHIRKA 24/10/2024,

Muqdisho:25/11/2024:- Waxaa Shirka Qorshaha Is-badel Qaran ka qayb galay wefdi uu Hoggaminayey Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Qorshaynta Iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Maamulka SSC-Khaatumo: Mudane Cismaan Aadan Xuseen. Shirkaas oo u jeedadiisu ahayd xaqiijinta qorshihii uu Maamulku usoo gudbiyey shirka 24/10/2024, iyada hortabin looga dhigay qorshayaasha hortabinta uleh Maamulka SSC-Khaatumo.

Agaasimaha waxaa ku weheliyey shirka Sagaal Agaasime oo ka kala socday Wasaaraddaha Maamulka SSC-Khaatumo.



SHIRARKA HAY'ADAHA DEEQ-BIXIYAYAASHA CAALAMKA IYO MAAMUL-GOBOLLEEDYADA DALKA,

Muqdisho: 26 - 27/11/2024:- Waxa Caasimaadda Soomaaliya ka socday shirar lagula tashanayey Hay'adaha Deeq-Bixiyayaasha Caalamka iyo Maamul-Gobolleedyada dalka, waxaana goobtaa lagag hadlay qaabkii lagu hirgelin lahaa qorshaha Isbeddelka Qaranka kaasi oo socoday muddo afar bilood ah, Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee Maamulka SSC-khaatumo Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa halkaa ku Soo bandhigay qorshayaasha hortabinta u leh Maamulka SSC-Khaatumo ee shanta sannadood ee soo socota.



SHIRKA QIIMAYNTA IYO DABAGALKA

Muqdisho: 16/12/2024:- - Waxa caasimadda DFS ka furmay shirkii qiimaynta iyo dabagalka qaranka kaasi oo ah kii ugu horreeyey ee laga qabto dalka. Shirka waxaa ka qayb galay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Calaamiga ah Ee Maamulka SSC-Khaatumo: Muddane Cismaan Aadan Xuseen oo uu weheliyo Agaasimaha Dabagalka iyo Qiimayta.

Shirku intuu socday waxaa lagu soo bandhigay horumarka, caqabadaha, iyo mustaqbalka sidii loo xoojin lahaaa isla-xisaabtan, daahfurnaanta iyo isku-duba ridka barmaamijka Isla-xisaabtanka, iyo dabagalka Dowladdaha , Hay'adda iyo Deeq-bixiyayaasha Calaamiga ah.



MAALINATII LABAD SHIRKA QIIMAYNTA IYO DABAGALKA

Muqdisho: 17/12/2024:- Waxa caasimadda DFS ka furmay shirkii qiimaynta iyo dabagalka qaranka kaasi oo ah kii ugu horreeyey ee laga qabto dalka. Shirka waxaa ka qayb galay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Calaamiga ah Ee Maamulka SSC-Khaatumo: Muddane Cismaan Aadan Xuseen oo uu weheliyo Agaasimaha Dabagalka iyo Qiimaynta Mudane Eng-Cabdiqaadir Saleebaan.

Agaasimaha Guud oo Halka ku Soo Bandhigay" horumarka, iyo Mustaqbalka sidii loo xoojin lahaaa isla-xisaabtan, daahfurnaanta iyo isku-duba ridka barmaamijka Isla-xisaabtanka, iyo dabagalka Maamulka SSC-Khaatumo taasi oo lagu hagi doono Hay'adda iyo Deeq-bixiyayaasha Calaamiga ah.



HAY'ADAHA CAALAMIGA AH EE KA SHAQEEYA DEEGAANADA SSC-KHAATUMO.

Laascaanood, 24/12/2024: Waxa hoolka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee Maamulka SSC-Khaatumo ka qabsoomay kulan muhiim ah oo u dhexeeyey hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya deegaanada SSC-Khaatumo. Kulankan ayaa diiradda lagu saaray sidii loo xoojin lahaa wada shaqaynta ka dhaxaysa Maamulka SSC-Khaatumo iyo hay'adaha caalamiga ah, iyadoo si gaar ah loo falanqeeyey xaaladda dadkii ka soo barakacay Ceerigaabo iyo qaabkii loo fulin lahaa adeegyada gargaarka ee loo baahan yahay.

Intii kulanku socday, waxaa laga wada hadlay muhiimadda iskaashiga u dhexeeya dowladda iyo hay'adaha, si loo xaqiijiyo in qolo waliba qaadato masuuliyaddeeda shaqo. Waxaa kaloo la isla gartay in la dardargeliyo hawlaha wada shaqaynta ee u dhexeeya Maamulka SSC-Khaatumo iyo hay'adaha caalamiga ah ee ka hawlgala deegaanka.



HAY'ADDAHA DEEGGAANKA EE "LOCAL " AH EE KA SHAQEEYA SSC-KHAATUMO.

Laascaanood 26/12/2024:- Waxa hoolka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalimaga ah, saaka ka qabsoomay kulan u dhexeeya hay'addaha deeggaanka ee "Local " ah ee ka shaqeeya SSC-Khaatumo. Kulanku intuu socday waxaa la iska xog wareystay xaalada dadkii kasoo barkacay Ceerigaabo iyo sidii wax loogu qaban lahaaa oo dowladda iyo hayadduhuba iskashanlahaayeen loona xoojin laha hawlaha wada shaqeynata Maamulka SSC-Khaatumo iyo hayadda deeggaanka"Local" ah ee deeggaanka ka Hawl gala qolokastaana u qaadan lahayd masuuliyadeeda.

Shirka waxaa ka soo qayb galay Hay'adda Barkacayaasha iyo dib u dejinta Maamulka SSC-Khaatumo, iyo xubno kale dowladda SSC-Khaatumo ah.



KULANKA AQOONYAHANKA & WASAARADDA

Laascaanood 03/1/2025:- Agaasimaha Guud Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa furay shirka Kulanka Aqoonyahanka iyo Wasaaradda Qorsheynta iyo horumarinta iskaashiga caalamiga SSC-Khaatumo.

Wasaaradda Qorsheynta SSC-Khaatumo Ayaa soo agaasintey Kulanka aqoonyahanka Deegaanka iyo Wasaaradda. kulanka oo u jeedkiisu ahaa latashiga Aqoonyahanka Ee arimaha horumarinta Maamulka iyo darsidda caqabadaha taagan iyo soo jeedinta xalalkooda



MASHRUUCA "SIDA III" OO AY HIRGELIN DOONTO HAY'ADDA "ADRA"

Laascaanood: 4/JAN/2025:- Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Iyo Iskaashiga Caalamiga ah Ee SSC-Khaatumo: Mudane Axmed Diiriye oo uu weheliyo Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda: Mudane Cismaan Aaadan Xuseen ayaa daahfuray mashruuca "SIDA III" oo ay hirgelin doonto hay'adda "ADRA" oo qayb ka ah: Somali Resilience Program (SomReP). Daahfurka waxa ka soo qayb galay: Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Beeraha, Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha, Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Deegaanka & Isbdedlka Cimiladda, iyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta Ee Wasaaradda Waxbarashadda. Mashruucan oo socon doona labadda sano ee soo socota ayaa ujeedkiisu yahay in uu gacan ka geysto yareynta saameynta abaarta, nabaad-guurka iyo caqabadaha kale ee ku gadaaman nolosha bulshada deegaannadda SSC-Khaatumo, iyadoo kor loo qaadayo awoodda bulshada si ay uga jawaabaan xaaladaha deg-degga ah ee soo noqnoqda.



SHIRKA ISKU-DUBARIDKA ARIMAHA GARGAARKA

Laascaanood:5/JAN/2025:- Shirka iskudubaridka arimaha gargaarka maamulka SSC-Khaatumo.

Shirka waxaa qayb ka ahaa: OCHA iyo Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka Ee Maamulka SSC-haatumo, Kulanka waxa kasoo qaybgalay Hay'adaha UN-ka, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah. intii kulanka socoday dhamman madaxda ka kalsocoday dowladda, iyo hayadduhu waxa aay Soo jeediyen baahiyaha, caqabada iyo sidii xal waar looga heli laha hawlaha Binaadantimo ah ee ka jirta deeggaanka maamulka SSC-Khaatumo

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Qorshaynta Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa soo bandhigay waxyaalaha hortabinta u leh maamulka iyo in ay markasta diyaar u yihiin aay wada shaqeyna iyo soo dhaweyn u hayaan Dhammaan cidkasta oo ixtiramaysa sharciyada Maamulka SSC-Khaatumo.



DHISIDA GUDDIYADA KORMEERKA & QIIMAYNTA EE SSC-KHAATUMO:

Laascanood : 11/01/2025:- Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta Iyo Iskaashiga Caalamiga ah Maamulka SSC-Khaatumo oo kaashanaysa Wasaaradda Qorshaynta Ee Dawladda Fedaraalka iyo Hubaal institute, ayaa dhisay guddiyada kormeerka iyo qiimaynta Maamkulka SSC-Khaatumo. Si kor loogu qaado shaqada Maamulka SSC-Khaatumo. Shirkan waxaa ka soo qeybgalay,Agaasimaha Waaxda M&E Wasaaradda Qorshaynta Soomaaliya Mudane Maxamud Siciid, , oo ay weheliyaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta SSC-Khaatumo Mudane Cismaan Aadan Xuseen iyo Agaasimaha Waaxda M&E ee Wasaaradda Qorshaynta SSC-Khaatumo Mudane Cabdiqaadir Saleebaan iyo hawl-wadeeno ka socoda dhammaan Wasaaraddaha Maamulka SSC-Khaatumo.



Laascanood : 13/01/2025:- Wasiirka wasaaradda qorshaynta SSC khaatumo mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye ayaa xarunta wasaaradda kulan kula qaatay agaasimaha waaxda M&E ee WQ DFS mudane Maxamuud Saed Nuur.

Kulanka oo ay ku wheliyeen agaasimaha guud ee wasaaradda mudane Cismaan Aadan xuseen iyo agaasime waaxeedyada wasaaradda.

Wasiirka ayaa war bixin kasiiyay hawlaha wasaaradda sidoo kalana uga mahadceliyay doorkiisa shariifka ah ee wada shaqaynta iyo iskaashiga ah isaga iyo guud ahaan wasaaradda qorshaynta DFS.



WASAARADDA QORSHAYNTA, WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO HAY'ADDA DANSOM:

Laascaanood: 5/Maarso/2025:- Waxa ka dhacay Hall-ka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta Iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Maamulka SSC-Khaatumo shir muhiim ah oo dhex maray hawl-wadeenada Wasaaraddaha Qorshaynta iyo Wasaaradda Caafimaadka, iyo Hay'adda DanSomala, oo ah hay'ad ay aas-aaseen gabdho reer SSCKH ah oo ku nool dalka Denmark, kana shaqeeya arrimaha caafimaadka, ujeedada shirkan oo ahaa xoojinta, isla xisaabtanka iyo hufnaanta hawlaha shaqo ee loo hayo maamulka SSC-Khaatumo.

Shirka oo uu guddoominayey Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Mudane Axmed Abdirisaaq Diriiye goobjoogna uu ahaa Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Mudane Cusmaan Aadan Xuseen, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka Agaasimaha Guud ee Dhakhtarka Weyn ee Laascaanod, iyo Agaasime waaxeedyada Wasaaradda Qorshaynta.



SHIRKA BILAHA AH EE HAY'ADAHA MADAXABANAAN IYO WASARAADDA QORSHAYNTA

Laascaanood: 8/April/2025:- Waxa hall-ka Wasaaradda Qorshaynta ka dhacay kulan u dhexeeya hay'adaha ka shaqeeya Maamulka SSC-Khaatumo.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ah Maamulka SSC-Khaatumo Mudane Cusmaan Aadan Xuseen ayaa furay kulankas oo daaranaa is wareysi iyo xoojinta xidhiidhka hay'addaha iyo dowladda.

Dhamaan Madaxda hay'addaha ayaa halkaa kusoo bandhigay shaqooyinka kala duwan ee ay deegaanka ka hayaan iyo waxyaalaha ay rajeynayaan.



WASIIRKA WASAARADDA QORSHAYNTA DFS OO KULAN SHAQO KU YIMI WASAARADDA QORSHAYNTA

Laascaanood: 13/April/2025:- Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Dawlada Soomaaliya Mudane Maxamud Cabdiraxmaan Beene-beene ayaa saaka kulan shaqo kuyimi xarunta wasaaradda qorshaynta ee Maamulka SSC-Khaatumo.

Wasiirka waxaa weheliyay wasiiru dawlaha, iyo agaasimaha waaxda M&E. Waxaana xarunta wasaaradda kusoo dhaweeyey Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye, Agaasimaha Guud Mudane Cismaan Aadan Xuseen iyo dhammaan tiimka wasaaradda.

Wasiirka ayaa xafiisyada waaxyaha wasaarada mid mid ugalay, halkaas oo uu warbixin kaga dhegaystay agaasimayaasha waaxaha kala duwan ee wasaaradda.

Markii booqashadaasi soodhamaatayna waxu Wasiir Beene-Beene shir laqaatay tiimka wasaaradda.



TABABARKA LA SOCODKA GUULLAHA IYO DIYAARINTA WARBIXINADA QORSHAHA ISBEDELKA QARANKA.

Laascaanood: 26/May/2025:- Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah Ssc-khatumo Mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye ayaa maanta si rasmiya u daahfuray tababar la xidhiidha la socodka guullaha iyo diyaarinta warbixinada qorshaha isbedelka qaranka, ee guddiga kormeerka iyo qiimaynta ee dawlada faderallka iyo dawladaha xubnaha ka ah.

Agaasimaha guud ee Wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa so dhoweeyay dhamaan masuuliyiinta iyo agaasimayaasha dawlada goboleedyada dalka ee maanta tababarku u furmay, sidoo kale Agaasimaha ayaa ku dheeraday sida wasaaradda qorshayntu diyaar ugu tahay marti-gelinta shirarka heer faderaalka .



SHIRKA ISBUUCLAHA AH EE WASAARADDA QORSHAYNTA DAWLADDA WAQOOYI BARI

-Laascaanod, 03/09/2025 - Waxaa hoolka Wasaaradda Qorshaynta Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ee Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari ka qabsoomay shirka isbuuc laha ah ee wasaaradda, kaas oo uu shir guddoominayay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cismaan Aadan, ayna ka soo qayb galeen agaasime waaxeedyada iyo shaqaalaha wasaaradda .

Shirkan, oo ah mid joogto ah, waxaa ujeedkiisu yahay dardargelinta hawlaha shaqo ee wasaaradda, kala xog-qaadashada, iyo qorshaynta hawlaha marba hortabinta u leh wasaaradda.

Ugu dambeyntii, agaasimaha guud wuxuu mahadnaq iyo bogaadin u soo jeediyey shaqaalaha wasaaradda, muddadii ay mutadawcnimada ahayn ee ay deegaankooda u soo shaqeeyeen iyo sida ay ugu dhabar adeegeen maamulkooda.



KULANKA WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HAY'ADDA ALIGHT.

Laascaanood: 06/09/2025: Waxaa hoolka wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo xidhiidhka calaamiga ah ee dawlad goboleedka Waqooyi Bari ka qabsoomay kulan u dhexeeya Wasaaradda Qorshaynta iyo Hay'adda ALIGHT.

Kulankaas oo u jeedadiis ahayd isla xisaabtan iyo xog waraysi. Kulanka waxaa shir guddoominayay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cismaan Aadan, oo ay weheliyeen agaasimayaasha waaxyaha wasaaradda.

Intii kulanku socday, hay'adda ALIGHT waxay soo bandhigtay mashaariicda ay ka wado DG Waqooyi Bari. Dhinaca kale, agaasimayaasha wasaaradda ayaa su'aalo wax ku ool ah waydiiyay hay'adda intii kulanku socday.



WASARAADDA QORSHAYNTA & HUMANITY INCLUSION (HI)

Laascaanood: 10/09/2025, Waxaa Hoolka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Calaamiga ah ee DG Waqooyi Bari ka qabsoomay kulan u dhexeeya Wasaaradda Qorshaynta iyo Hay'adda HUMANITY INCLUSION (Hi).

Kulankaas oo ujeedadiis ahayd isla xisaabtan iyo guulaha laga gaadhay mashruuca RIMSCASSA ee ay HI ka wado deegaanada Waqooyi Bari.

Kulanka waxaa shir guddoominayay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cismaan Aadan, oo ay weheliyeen agaasimayaasha waaxyaha wasaaradda. Intii kulanku socday, hay'adda Humanity Inclusion (Hi) waxay soo bandhigtay faaiidoyinka laga gaadhay Mashruuca RIMSCASSA.

Dhinaca kale, Agaasimayaasha wasaaradda ayaa su'aalo wax ku ool ah waydiiyay hay'adda intii kulanku socday.



SHIRKA HANNAANKA SHAQAYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDELKA QARAN.

Muqdisho 15-16/09/2025 Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee Dowladda gobolleedka waqooyi Bari ee Soomaaliya, Muddane Cismaan Aadan Xuseen ayaa ka qayb galay shirka hannaanka shaqaynta tiirarka qorshaha isbedelka qaran. Shirkan ayaa lagaga hadlayey hannaanka wada-shaqeynata tiirarka dowlad wanaaga, iyo horumarinta dhaqalaha ee qorshaha isbeddelka qaranka “Qiq 2025-2029”.

Shirkan oo uu daahfuray Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha muddane Maxamed Shire, waxaa ka soo qeybgalay Wasaaradaha Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, Hay’adaha Qaramada Midoobay, wakiilada safaarada dalka, deeq-bixiyeyaal, ganacsato iyo ururrada bulshada rayidka.



SHIRKA HANNAANKA SHAQAYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDELKA QARAN.

Muqdisho 17-18 September /2025

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Xidhiidhka Caalamiga ah ee Dowladda gobolleedka waqooyi Bari ee Soomaaliya, Muddane Cismaan Aadan Xuseen ayaa ka qayb galay shirka hannaanka shaqaynta Tiirarka qorshaha isbedelka qaran. Shirkan ayaa lagaga hadlayey hannaanka wada-shaqeynata tiirarka Arrimaha Bulshada, iyo Deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee qorshaha isbeddelka qaranka “Qiq 2025-2029”.



WASAARADDA QORSHEYNTA IYO HAY'ADDA CARE INTERNATIONAL.

Laascaanood – 09/10/2025:

Waxaa hoolka Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowlad-Goboleedka Waqooyi Bari ka qabsoomay kulan muhiim ah oo dhexmaray Wasaaradda Qorsheynta iyo Hay'adda Care International.

Kulankan oo muhiimad gaar ah lahaa ayaa diiradda lagu saaray isla xisaabtan, dhegeysiga warbixinno la xiriira mashaariicda socda, iyo ka doodista qorsheyaasha mustaqbalka ee labada dhinac. Sidoo kale, saraakiisha hay'adda Care International waxay soo bandhigeen warbixin (presentation) faahfaahsan oo ku saabsan waxqabadka hay'adda iyo qorshaha sanadaha soo socda.



SHIRKA DIB-U-EEGISTA WAXQABADKA WASAARADDA QORSHAYNTA DAWLADDA WAQOOYI BARI

Laascaanood: 22/10/2025

Waxaa hoolka wasaaradda qorshaynta ka qabsoomay shirka dib u eegista waxqabadkii wasaaradda, Shirkaas oo uu guddoominayay wasiirka wasaaradda qorshaynta mudane Axmed Cabdirisaaq Diiriye oo uu weheliyo Agaasimaha guud ee wasaaradda mudane Cismaan Aadan Shirkan oo socon doona muddo saddex maalmood ah waxaa kasoo qaybgalay agaasime waaxeedyada wasaaradda, iyo dhammaan hawlwadeenada waaxyaha wasaaradda.



XIL-WAREEJINTA WASIIRKII HORE EE WASAARADDA & WASIIRKA CUSUB EE WASAARADDA QORSHAYNTA

Laascaanood: 17 November 2025 –

Waxa hoolka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dawlad-Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya ka qabsoontay munaasabad si rasmi ah loogu kala wareejinayay xilka Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah.

Sidoo kale munaasabadda waxaa ka qaybgalay Wasiir Ku-xigeenka cusub ee Wasaaradda Mudane Axmed Aadan Siciid, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen iyo dhammaan shaqaalaha kala duwan ee Wasaaradda.



KULANKA SOO DHAWEYNTA WASIIRKA CUSUB EE WASAARADDA QORSHAYNTA WAQOOYI BARI

Laascaanood: 23/11/2025:-

Waxa hoolka Wasaaradda ka dhacay kulan lagu soo dhaweynayay Wasiirka cusub ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Calaamiga ah Mudane Cali Dhakaawe. Kulanka oo u jeedadiisu ahayd soo dhaweyn, isbarasho, iyo kala xog qaadasho.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa warbixin balaadhan wasiirka kasiiyay shaqooyinkii ay soo waday wasaaradu, gabagabadiina agaasimaha ayaa hawl wadeenada wasaaradda usoo jeediyay inay ilaalilyaan amaanada ay u hayaan shacabka, kuna amaanay shaqooyinkii ay soo qabteen intay joogeen wasaarada. Sidoo kale Agaasime qaybeedyada ayaa kasoo jeediyay shirkaa waax walba shaqadii u qabsoontay mudadii ay wasaaradu jirtay.



2025 DEVELOPMENT SOLUTIONS CONFERENCE
SHIRWEYNAHA XALALKA
26th - 27th November 2025

SHIRWEYNAHA XALALKA HORUMARINTA SOOMAALIYA

Muqdisho 26-27 November /2025

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda gobolleedka waqooyi Bari ee Soomaaliya, Muddane Cismaan Aadan Xuseen ayaa ka qayb galay shirweynaha xalalka horumarinta Soomaaliya kaasi oo lagu saleeynayey Tiirarka qorshaha isbedelka qaran.

Shirkan oo ay daahfurtay Agaasimaha Guud Hay'adda horumarinta Reer miyiga iyo xalka waar marwo Sahra Cabdi Maxamed , waxaan ka soo qeybgalay Wasaaradaha Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, Hay'adaha Qaramada Midoobay, wakiilada safaarada dalka, deeq-bixiyeyaal, ganacsato iyo ururrada bulshada rayidka.



MADAXDA HAY'ADDA UN OCHA & AGAASIMAHA GUUD

Muqdisho, 28/11/2025

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta, iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Waqooyi Bari, Mudane Cismaan Aadan Xuseen, ayaa kulan la yeeshay madaxda Hay'adda UN OCHA, ku xigeenka xafiiska Soomaaliya Mr. Blaise Kabongo, iyo madaxda isku xidhka hawlaha arrimaha gargaarka Mr. Biruk Kebede Abetew.

Ujeedada kulanka ayaa ahayd is-barasho iyo xoojinta wada shaqeynta u dhexeysa Dowladda Goboleedka Waqooyi Bari iyo Hay'adda UN OCHA. Agaasimaha Guud ayaa siiyey warbixinno dhammaystiran oo ku saabsan abaaraha ka jira deegaanka, kuwaas oo u baahan gargaar degdeg ah.



SHIRKA XOOJINTA WADA-SHAQEYNTA HAY'ADAHA DOWLADDA FEDERAALKA, DOWLAD-GOBOLEEDYADA

29-ka November – Muqdisho

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya, Mudane Cismaan Aadan Xuseen, ayaa maanta ka qayb galay shirka xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha dowladda Federaalka, dowlad-goboleedyada iyo dowladaha hoose ee dalka.

Shirkan oo ay soo qaban-qaabisay Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, ayaa diiradda lagu saaray kor u qaadidda wada-shaqeynta hay'adaha saddexda heer ee dowladeed. Waxaa lagu soo bandhigay warbixin ku saabsan xaaladda iskaashi ee hadda jirta, caqabadaha taagan, iyo sidii adeeg dawladeed oo wanaagsan loo gaadhsiin lahaa Bulshada Soomaaliyeed.



SHIRKA GOLAHA HORUMARINTA QARANKA

Muqdisho, 4/12/2025

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta, iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Mudane Cali Warsame oo u wehliyo Agaasimaha Guud Mudane Cismaan Aadan Xuseen iyo Saynab Cabdiraxmaan, ayaa maanta ka qaybgalay shirkii Golaha Horumarinta Qaranka “National Development Council.”

Shirkan oo ay soo agaasintay Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqalaha Qaranka Soomaaliyeed, ayaa sannadkiiba mar dhacaya, waxaana ka qaybgalaya dhamaan dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Shirku wuxuu xooga saarayaa xoojinta iyo wada shaqeynta hay’adda dowladda Federaalka iyo dowladaha goboleedyada.



SHIRKA WASAARADAHA QORSHAYNTA HEER MAAMUL HEER FEDARAAL IYO HAY'ADDA (FAO).

Muqdisho: 03/2/2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta, iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Cismaan Aadan Xuseen, ayaa maanta ka qayb galay shirka wasaaradaha qorshaynta heer maamul, heer fedaraal iyo hay'adda (FAO).

Shirkan oo ay soo qaban qaabiyeen hay’adda FAO iyo Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dawlada Fedaraalka, ayaa ujeedadiisu ahayd diyaarinta qorshaha hay'adda (FAO, Somalia) ee shanta sannaddood ee soo socota "2026-2030" iyada oo la raacayo qorshaha Is-beddelka Qaranka "2025-2026".



TABABARKA KOR UQAADISTA WACYIGA SHAQAALAHA WASAARADDA QORSHAYNTA WAQOOYI BARI

Laascaanood:9/Feb/2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa furay tababarka kor u qaadaya wacyiga shaqaalaha wasaaradda.

Tababarkaas oo uu qabanayay Ustaad Cabdullaahi Yuusuf ayaa muhiimad gaar ah u lahaa shaqaalaha wasaaradda, isagoo diirada saarayay kor u qaadista wacyiga shaqaalaha, gudashada waajibaadka, ilaalinta amaanada ay hayaan shaqaalahu wasaarada, bulshadda,iyo Dowladda Waqooyi Bari.



TABABARKA QORSHEYNTA, ISKU-DUWIDA & KORMEERKA BARNAAMIJYADA HORUMARINTA

Laascaanood:_ 14/02/2026

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa furay Tababar Ku Saabsan Qorsheynta, Isku-duwidda iyo Kormeerka Barnaamijyada Horumarinta taas oo loo qabtay agaasimayaasha waaxaha qorshaynta ee wasaaradaha iyo shaqaalaha wasaaradda qorshaynta si kor loogu qaado aqoontooda iyo xirfadoodda.

Waxaa kale oo faahfaahin ka bixiyeey tababarkan agaasimaha waaxda Qorshaynta mudane Maxamed Cabdiraxmaan Ruush isaga oo dhankiisa adkeeyey in ay muhiim tahay in markasta xoogga la saaro kor u qaadida aqoonta agaasimayaasha waaxaha qorshaynta ee Dawladda.



KULAN ISKU-DUWID AH OO U DHAXEEYA WASAARADA & HAY'ADDAHA CAALAMIGA

Laascaanood: 15/02/2026

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Mudane Cismaan Aadan Xuseen oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ayaa kulan fogaan-arag ah la qaatay qaar ka mid ah hay'adaha caalamiga ah.

Kulankaas ayaa Wasaaraddu ku soo bandhigtay guulaha ay Dawladdu gaadhay, waxaana sidoo kale looga hadlay caqabadaha jira iyo arrimaha mudnaanta u leh Dawladda Waqooyi Bari, sida taageeridda dadka ay abaaruhu saameeyeen, shaqo-abuurka dhallinyarada, maamul-dhiska, iyo xoojinta wada shaqeynata sida in la sameeyo nidaamka kormeerka iyo qiimaynta (Monitoring and Evaluation).



SHIRKA SADDEX BILOODLAHA EE WASAARADDA

Laascaanood: 30/Mar/2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Dawladda Waqooyi Bari, Mudane Cali Warsame Cismaan (Dhakaawe) oo uu weheliyo Agaasimaha Guud Mudane Cismaan Aadan, ayaa shir-guddoomiyay shirka saddex biloodlaha ah ee wasaaradda.

Shirkan ayaa ujeedkiisu ahaa:

1. Soo bandhigista waxqabadkii saddexdii bilood ee hore (Quarter One). Iyo
2. Soo bandhigista qorshaha saddexda bilood ee soo socda (Quarter 2).

Wasiirka iyo Agaasimaha Guud ayaa si isku mid ah u bogaadiyay agaasimayaasha waaxyaha iyo hawlwadeenada wasaaradda iyagoo ku ammaanay dadaalka iyo dardargelinta ay ku wadaan shaqooyinka wasaaradda.



MADAXWEYNAHA AYAA KORMEER SHAQO KU YIMI WASAARADDA QORSHAYNTA WAQOOYI BARI

Laascaanood: 12/April/2026:-

Madaxweynaha Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali ayaa ku yimid kormeer shaqo Qorshaynta, Wasaaradda Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga ah Dawladda Waqooyi Bari.

Wasiirka Wasaaradda ayaa kalmad soo dhaweyn ka jeediyay kulanka, sidoo kale Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Mudane Osman Aden Hussen Warbixintaas oo ku saabsabanyd shaqooyinkii saddexdii bilood ee tagay, ee wasaaradda u qabsoomay & wasaaraddu hiigsanayso.



NATIONAL DEVELOPMENT COUNCIL.

Muqdisho: 14/April/2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta, iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Mudane Cali Warsame oo u wehliyo Agaasimaha Guud Mudane Osman Aden Hussen ayaa maanta ka qaybgalay shirkii Golaha Horumarinta Qaranka "National Development Council."

Shirkan oo ay soo agaasintay Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqalaha Qaranka Soomaaliyeed, ayaa saddexdii bilood baa mar dhacaya, waxaana ka qaybgalaya dhamaan dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Shirku wuxuu xooga saarayaa xoojinta iyo wada shaqeynta hay'adda dowladda Federaalka iyo dowladaha goboleedyada.



XIL-WAREEJINTA AGAASIMIHII HORE WASAARADDA QORSHAYNTA DFS IYO AGAASIMAHA CUSUB

Muqdisho: 15/April/2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dawladda Waqooyi Bari, Mudane Cali Warsame Cismaan, oo uu weheliyo Agaasimaha Guud Wasaaradda Mudane Osman Aden Hussen ayaa ka qayb galay munaasibadda xilka loogu kala wareejinayay Agaasimihii hore Wasaaradda Qorshaynta DFS iyo Agaasimaha cusub ee Wasaaradda Qorshaynta DFS.

Madaxda Wasaaradda Qorshaynta Dawladda Waqooyi Bari ayaa halkaa ka sheegay inay soo dhaweynayaan agaasimaha cusub wasaaradda, si dhowna ula shaqayn doonaan sidii ay horeba ula soo shaqeeyeen agaasimihii hore.



KORMEERKA MASHRUUCA XARUNTA DARYEELKA NAAFADA DOWLADDA WAQOOYI BARI

Laascaanood: 22/April/2026:-

Wasaaradda Qorshaynta ee Waqooyi Bari ayaa maanta kormeer rasmi ah ku samaysay mashruuca dhismaha Xarunta Daryeelka Halgamayaasha Waqooyi Bari (Northeastern State Rehabilitation Center) oo ka socda magaalada Laascaanood.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Mudane Osman Aden Hussen oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta, Ayaa indha-indheyn iyo kormeer ku sameeyey heerka uu marayo dhismaha xarunta, iyaga oo sidoo kale warbixin ka dhegeystay shirkadda gacanta ku haysa dhismaha mashruuca.



SHIRKA BILAHA AH EE WASAARADDA QORSHAYNTA

Laascaanood: 14/May/2026:-

Agaasimaha ayaa ee wasaaradda mudane Cismaan Aadan Xuseen ayaa shirgudoomey Shirka Billaha ah ee Wasaaradda qorshaynta, horumarinta iyo iskaashiga caalamiga ah ee Waqooyi Bari.

Shirkan waxaa kasoo qaybgalay agaasime waaxeedyada, madax qaybeedyada, iyo dhammaan shaqaalaha wasaaradda, iyadoo diiradda lagu saaray xoojinta wada shaqeynta, kor u qaadista hufnaanta shaqada iyo dardargelinta adeegyada horumarineed ee wasaaradda.

Intii uu shirku socday agaasimayaasha waaxuhu waxay soo bandhigeen Warbixinaha waxqabadka waaxyaha kala duwan iyo qorshayaasha hortabinta leh ee bilaha soo socda.

Agaasimaha Guud Mudane Cismaan Aadan ayaa adkeeyay muhiimadda ay leedahay isla xisaabtanka, Tayaynta shaqada si loo xaqiijiyo himilooyinka horumarineed ee wasaaradda.



FURISTA TABABARKA URURINTA XOGTA

Laascaanood: 16/May/2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah Mudane Osman Aden Hussen ayaa si rasmi ah u daahfuray Tababarka Isku-dhafan ee Ururinta Xogta Dijitaalka ah, Maareynta Sahannada, iyo Falanqaynta Xogta ee Madalal Kala Duwan ((Integrated Training on Digital Data Collection, Survey Management, and Multi-Platform Data Analysis)

Tababarkan oo uu qabanayay Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ayaa diiradda saaraya aqoon-isweydaarsi iyo kor u qaadista xirfadaha shaqaalaha wasaaradda, si loo xoojiyo awoodda hay'adda ee dhinacyada xog uruurinta casriga ah, maamulka sahannada, iyo falanqaynta xogta. Tababarka oo socon doona muddo saddex maalmood ah, waxaa si buuxda uga qaybgalaya dhammaan hawlwadeennada wasaaradda, iyadoo la xoojinayo aqoonta iyo tayada shaqo ee shaqaalaha.



SOODHAWEYNTA AGAASIMAHA GUUD WASAARADDA QORSHAYNTA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMALIYA

Laascaanood: 21/May/2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah Mudane Osman Aden Hussen ayaa soo dhaweeyey wefti heer Federaal ah oo uu hoggaaminayo Agaasimaha guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax, (Cabdifataax Hiirad). Oo uu wehelinayo agaasimaha Waaxda qorshaynta ee Wasaaradda qorshaynta DFS Mudane Maxamed Weli sidoo kale Weftigan ayaa waxaa ka mid ah, masuul ka tirsan midowga Yurub, iyo masuul ka socda xafiiska mashaariicda ee Wasaaradda Qorshaynta.

Socdaaldka weftigan ayaa daaran Aqoon-is-weydaarsi Isku-dubaridka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) ee Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari. (National Transformation Plan (NTP) Coordination Workshop for Northeastern state.



DAAHFURKA AQOON-ISWAYDAARSIGA QORSHAHA ISBEDELKA QARABKA NTP

Laascaanood: 23/May/2026:-

Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Axmed Aadan Siciid (Ayuub) ayaa daahfuray isku dubbarid Qorshaha Is-bedelka Qaranka ee Dowladda Waqooyi Bari.

Shirkaa oo ay kasoo qayb galeen Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta DFS Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Dowladda Waqooyi Bari Mudane Cusmaan Aadan Xuseen, Agaasimaha Waaxda Qorsheynta Wasaaradda Qorsheynta DFS Mudane Maxamed Weli, Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradda Dowladda Waqooyi Bari, Hanti-Dhowraha Guud, Agaasime Waaxeedyadda Wasaaraddaha iyo Hawl-Wadeenadda Farsamo ee Labada Wasaaradood ee Qorshaynta Heer Federaal iyo Heer Maamul ayaa socon doona muddo saddex maalmood ah.



SOO XIDHISTA AQOON-ISWAYDAARSIGA QORSHAHA ISBEDELKA QARABKA NTP

Laascaanood: 24/May/2026:-

Agaasimaha guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Osman Aden Hussen ayaa maanta soo xidhay Shirka Aqoon iswaydaarsiga isku dubbaridka Qorshaha Is-bedelka Qaranka ee Dowladda Waqooyi Bari.

Shirkaa oo ay kasoo qayb galeen maalintiisii labaad agaasimaha waaxda qorshaynta Qaranka , agaasimayaasha guud ee wasaraadaha waqooyi bari, agaasimayaasha waaxaha qorshaynta Dowladda Waqooyi Bari iyo Hawl-Wadeenadda Farsamo ee Labada Wasaaradood ee Qorshaynta Heer Federaal iyo Heer Maamul

Shirkan intuu soconayay labadaa maalmood ayaa lagu lafa guray tiirarka qorshaha Qaranka, samynta qorshayaasha sannadlaha ah , kuwa shanta sano iyo waafajinta mudnaanta qorshayaasha ee Dawladda waqooyi bari



AGAASIMAHA GUUD WASAARADDA QORSHAYNTA DFS AYAA KORMEER SHAQO KU YIMI WASAARADDA

Laascaanood: 25/May/2026:-

Agaasimaha Guud ee wasaaradda Qorshaynta, Waqooyi Bari Mudane Osman Aden Hussen ayaa wasaaradda kusoo dhaweeyey weftiga ka socday Wasaaradda Qorshaynta DFS uu hogaaminayay Agaasimaha Guud Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax. Agaasimaha ayaa kormeer shaqo ku maray xafiisyadda wasaaradda halkaas oo warbixin kaga dhageystay Agaasimaha Guud iyo hawl-wadeenadda wasaaradda qorshaynta waqooyi bari.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta DFS ayaa halkaa ka jeediyey hadalo xog waran, mahadcelin ah, isagoo qiray sida ay u diyaarsantahay wasaaradda qorshaynta waqooyi bari sheegaynna in wasaaradda qorshaynta waqooyi bari ay kaga horeyso nidaamka dhijitaalka ee adeegyadda wasaaradda lagu bixiyo guud ahaan wasaaraddaha kale qorshaynta ee maamulada dalka.







KULANKA AGAASIMAHA GUUD WASAARADDA QORSHAYNTA DFS & AGAASIMAHA GUUD MOPDIC

Muqdisho: 23/June/2026:-

Agaasimaha Guud Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya Mudane Osman Aden Hussen ayaa kulan la yeeshay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya DFS Mudane Cabdifataax Cabduqaadir Hiired.

Kulankaas ayaa si qotodheer looga wada hadlay arimaha xoojinta wadashaqaynta iyo iskaashiga labada wasaaradood, helida tababaro iyo aqoon is waydaarsiyo kor loogu qaadayo aqoontooda hawl-wadeenadda wasaaradda Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga Waqooyi Bari , xidhiidh u samaynta wasaaradda qorshaynta Waqooyi Bari, iyo sidii mashaariicda horumarinta mudnaanta koobaad loo siin lahaa Dawladda Waqooyi Bari.



SHIRKA WARBIXINTA SABOOLNIMADA CARUURTA EE DHINACYADA BADAN

Muqdisho: 24/June/2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya Mudane Osman Aden Hussen uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Tirakoobka Mudane Xasan Xaashi Aaden ayaa ka qayb galay shirka warbixinta saboolnimada carruurta ee dhinacyada badan (Multidimensional Child Poverty Report)

Shirka waxaa ka soo qayb galay wakiillo ka socday dhammaan maamullada dalka, hay'adaha dowladda, iyo bahwadaagta horumarinta xogta Soomaaliya.



MULTIPLE INDICAATOR CLUSTER SURVEY

Muqdisho: 26, June, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Woqooyi Bari Mudane Osman Aden Hussen , oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Tirokoobka, Mudane Hassan Hashi Aden, ayaa ka qayb galay shir heer qaran ah oo ay soo qabanqaabisay Hay'adda Tirokoobka Soomaaliyeed. Shirka waxaa ka soo qayb galay dhammaan dowlad goboleedyada dalka, waxaana si gaar ah diiradda loo saaray qorsheynta iyo hirgelinta MICS Survey (Multiple Indicator Cluster Survey).

Shirka waxaa sidoo kale ka qayb galay khubaro ka socotay hay'adaha caalamiga ah ee la shaqeeya arrimaha xog ururinta iyo horumarinta tirakoobka.



SHIRKA TODOBAADLAHA EE WASAARADDA

Laascaanood: 02, July, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya Mudane Osman Aden Hussen ayaa shir gudoomiyey shirka todobaadlaha ah ee wasaaradda.

Shirkaas oo lagaga hadlayay shaqooyinkii wasaaradda u qabsoomay saddexdii bilood ee tagay, warbixinada safaradii wasiirka iyo agaasimaha guud, iyo tababarkii hawl-wadeenadda wasaaradda u socday bishii dhamaatay soo xidhistiisa.

Ugu dambeynna agaasimaha guud ayaa hawl-wadeenadda wasaaradda kula dardaarmay in shaqada wasaaradda lasii laba jibaaro yada oo kor loo qaadayo tayada shaqada si khaas wakhtiga loo adeegayo Shacabka Reer Waqooyi Bari



XIDHISTA TABABARKA URURINTA XOGTA & FALAQAYNTA

Laascaanood: 06, July, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya Mudane Osman Aden Hussen ayaa maanta shahaadooyin guddoonsiiyey hawlwadeennada wasaaradda oo si guul leh u soo dhammaystay tababarka Ururinta iyo Falanqaynta Xogta (Data Collection & Data Analysis), kaas oo socday muddo laba toddobaad ah.

Tababarkan, oo ay bixinayeen Agaasimayaasha Waaxaha Wasaaradda, ayaa ujeeddadiisu ahayd kor u qaadista aqoonta iyo xirfadaha hawlwadeennada ee dhinacyada ururinta, maaraynta iyo falanqaynta xogta, si loo xoojiyo tayada qorsheynta, dabagalka iyo qiimaynta barnaamijyada horumarineed.



SHIRKA QAAB-DHISMEEDKA BADQABKA URURADA AAN DOWLIGA AHAYN

Laascaanood: 11, July, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Osman Aden Hussen ayaa guddoomiyey shir muhiim ah oo lagaga hadlay Qaab-dhismeedka Badqabka iyo Amniga ee Ururrada Aan Dawliga Ahayn (NGO-yada) ee ka hawlgala Dowladda Waqooyi Bari ee Soomaaliya.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Amniga, iyo sidoo kale Agaasime-waaxeedyada Wasaaradda Qorshaynta.



SHIRKA HAY'ADDAHA DOWLADDA & HAY'ADDA LAANQAYRTA CAS

Laascaanood: 20, July, 2026:-

Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta, & Iskaashiga Caalamiga ayaa furay shirka wadashaqaynta hay'addaha dowladda & hay'adda laanqayrta cas. Wasiir ku xigeenka ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay iskaashi joogto ah oo dhexmara hay'adaha dowladda iyo kuwa bani'aadannimada.

Sidoo kale, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Mudane Osman Aden Hussen ayaa soo bandhigay baahiyaha mudnaanta u leh Dowladda Waqooyi Bari, isaga oo tilmaamay in hay'adaha Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ay si dhow ula shaqayn doonaan wasaaradaha ay khusayso sidii wax looga qaban lahaa baahiyahaas loona horumarin lahaa adeegyada bulshada.



SHIRKA ISKU-DUWIDDA ARRIMAHA HORUMARINTA & BANI'AADANNIMADA (NEXUS)

Laascaanood: 21, July, 2026:-

Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Wasaaradda Qorshaynta ee Dowladda Waqooyi Bari ayaa si wadajir ah u qabtay Shirka Isku-duwidda Arrimaha Horumarinta iyo Bani'aadannimada (Humanitarian–Development Nexus Coordination), kaas oo socon doona muddo saddex maalmood ah.

Shirka waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Osman Aden Hussen isagoo carrabka ku adkeeyey muhiimadda ay leedahay xoojinta iskaashiga iyo isku-duwidda howlaha bani'aadannimada iyo horumarinta si loo gaaro horumar waara.



SHIRKA ISKU-DUWIDDA ARRIMAHA HORUMARINTA & BANI'AADANNIMADA (NEXUS) MAALINTII 2AAD

Laascaanood: 22, July, 2026:-

Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan Waaxda Isku-duwidda Deeqaha (Aid Coordination Office - ACO), oo kaashanaysa Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, ayaa maanta magaalada Laascaanood ku qabtay maalintii labaad ee Shirka Isku-duwidda Heer Dowlad-Goboleed ee NEXUS. Maalintii labaad ee shirka ayaa si gaar ah diiradda loogu saaray laba ka mid ah tiirarka muhiimka ah ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029):

1. Economic Transformation Pillar (Tiirka Isbeddelka Dhaqaalaha)
2. Environmental and Climate Resilience Pillar (Tiirka Adkeysiga Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada)



COORDINATION FRAMEWORK |

Laascaanood: 23, July, 2026:-

Waxaa xarunta Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari ka qabsoomay kulan aqoon-kororsi ah oo ku saabsan Coordination Framework (Hannaanka Isku-duwidda Horumarinta), kaas oo loo qabtay Agaasimayaasha Waaxaha Qorshaynta ee Wasaaradaha Dowladda Waqooyi Bari.

Kulanka waxaa furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Osman Aden Hussen isaga oo carrabka ku adkeeyey muhiimadda ay leedahay in Agaasimayaasha Waaxaha Qorshayntu yeeshaan faham qoto dheer oo ku saabsan Coordination Framework (Hannaanka Isku-duwidda Horumarinta) iyo NTP Pillars (Tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka), si loo xoojiyo isku-duwidda, wada-shaqaynta iyo hirgelinta qorshayaasha horumarinta.



DAAHFURKA MAREEGTA CUDUDDA XOGTA SHAQAALAHA

Laascaanood: 26, July, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Osman Aden Hussen ayaa Daahfuray Tababarka System-ka (Human Resource Management Information System -HRMIS).

Agaasimaha ayaa ka warbixiyey qorshaha wasaaraddu ku hiigsaneyso dhijitaalaynta adeegyadda iyo fududeynta hawlaha shaqo ee wasaaradda. Agaasimaha ayaa waaxda maamulka & maaliyada ee wasaaradda ku amaanay in ay saaka la wareegayaan systemk-kii labaad iyagoo hore gacanta ugu hayay system-ka diiwaangelinta hay'addaha oo fududeeyay shaqadii waaxda. sidoo kale agaasimaha ayaa hawl-wadeenada wasaaradda kula dardaarmay dhaqangelinta system-ka oo ay baahi weyn u qabtay wasaaraddu.



DAAHFURKA MASHRUUCA BARWAAQO

Laascaanood: 03, Aug, 2026:-

Munaasabadda daahfurka, Wasiirka Qorshaynta DFS wuxuu carrabka ku adkeeyey muhiimadda mashruucani u leeyahay horumarinta bulshada iyo kobcinta nolosha reer miyiga. Waxa uu ku boorriyey dhammaan dhinacyada ay khusayso inay si hufan uga faa'iidaystaan fursadaha uu mashruucu bixinayo, si loo xaqiijiyo horumar waara iyo bulsho leh adkaysi iyo nolol tayo leh.

Sidoo kale, Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari Soomaaliya, Mudane Ayuub Aadan Siciid, iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cismaan Aadan Xuseen, ayaa ka hadlay muhiimadda Mashruuca Barwaaqo, iyagoo tilmaamay doorka muuqda ee uu ka qaadan doono horumarinta ilaha biyaha, ilaalinta deegaanka, iyo xoojinta adkaysiga bulshada reer miyiga.



SHIRKA ISKU-DUWIDA ARIMA BINI'AADANTINIMADA WAQOOYI BARI & OCHA

Laascaanood: 16, Aug, 2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Cali Warsame Cismaan ayaa soo xidhay Shirka Isku-duwida arimaha Bini'aadannimada Waqooyi Bari iyo Madaxda OCHA Soomaaliya.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Cusmaan Aadan Xuseen, Agaasime Waaxeedyada & Hawl-Wadeenadda Wasaaradda ayaa qayb ka ahaa shirkan.

Shirkan oo ay sidoo kale qayb ka ahaayeen Wasiiradda dowladda, Agaasimeyaal Guud, Xildhibaano, Hay'addaha Caalamiga, Hay'addaha Maxaliga ah iyo weftiga qaramada midoobay ka socday ayaa diiradda lagu saarayay mashaariicda horumarinta, xaaladaha bani'aadannimo, iyo baahiyaha mudnaanta u leh bulshada deegaanka.



KULAN XOG WARAN AH WASIIRKU KAGA WARBIXIYEY SAFARADII UU GALAY & GUULIHII SAFARADAA

Laascaanood: 23, Aug, 2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga Dowladda Waqooyi Bari Mudane Cali Warsame Cismaan ayaa shirgudoomey kulan xogwarana ahaa wasaaradda ka qabsoomay. Kulanka waxaa warbixinno ku saabsan guulihii la gaadhay, caqabadihii jiray iyo qorshayaasha mustaqbalka ee Wasaaradda ka jeediyey Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Cusmaan Aadan Xuseen, iyo Agaasime-waaxeedyada Wasaaradda.

Agaasimaha Guud ayaa soo bandhigay warbixin ku saabsan hawlihii shaqo ee Wasaaraddu qabatay saddexdii bilood ee la soo dhaafay, isaga oo faahfaahiyey waxqabadkii la gaadhay, caqabadihii la kulmay iyo qorshayaasha lagu horumarinayo shaqada Wasaaradda. Sidoo kale, Agaasime-waaxeedyadu waxay soo bandhigeen warbixinno ku saabsan waxqabadka iyo hawlaha kala duwan ee waaxyahooda.



SHIRKA ISKU-XIDHKA QURBOJOOGTA & WASAARADDA QORSHAYNTA DOWLADDA WAQOOYI BARI

Laascaanood: 29, Aug, 2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Cali Warsame Cismaan ayaa si rasmi ah u furay Shirka Isku-Xidhka Qurba-Joogta Dowladda Waqooyi Bari iyo Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Dhankiisa, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Mudane Osman Aden Hussen , ayaa ka hadlay qorshayaasha horumarineed iyo meelaha mudnaanta u leh Dowladda Waqooyi Bari. Wuxuu si gaar ah u tilmaamay muhiimadda maalgashiga qaybaha wax-soo-saarka, adeegyada bulshada, kaabeyaasha dhaqaalaha iyo mashaariicda horumarineed ee wax ka tari kara kobaca dhaqaalaha iyo horumar waara.



SHIRKA WASAARADDA QORSHAYNTA DOWLADD & WARBAAHINTA MADAXABANAAN DEEGAANKA

Laascaanood: 31, Aug, 2026:-

Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Waqooyi Bari, Mudane Cali Warsame Cismaan ayaa maanta daahfuray kulan muhiim ah oo isku-xidh iyo wada-tashi ah oo dhexmaray Wasaaradda Qorshaynta iyo Warbaahinta Deegaanka Dowladda Waqooyi Bari.

Dhankiisa, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Mudane Cismaan Aadan Xuseen, ayaa Warbaahinta la wadaagay xog iyo warbixinno la xidhiidha xaaladda guud ee deegaanka, qorshayaasha horumarineed iyo kaalinta muhiimka ah ee Wasaaradda Qorshayntu ku leedahay isku-dubbaridka horumarinta iyo xoojinta iskaashiga hay'adaha kala duwan.



SHIRKA WADATASHIGA SIYAASADDA QARAN EE DEEQAHA EE DOWLAD-GOBOLEEDYADA

Muqdisho: 07, September, 2026:-

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Goboleedka Waqooyi Bari, Mudane Osman Aden Hussen oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, ayaa ka qaybgalay Shirka Wadatashiga Siyaasadda Qaran ee Deeqaha ee Dowlad-goboleedyada.

Shirka oo galay maalintiisii labaad, waxaa shir-guddoomiyay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Dowladda Goboleedka Waqooyi Bari, Mudane Cismaan Aadan Xuseen isagoo xusay muhiimadda ay leedahay in la helo Siyaasad Qaran oo mideysan oo hagta, isku-duwta, isla markaana nidaamisa deeqaha dalka.



Muqdisho: 8, September, 2026:-

Agaasimaha guud ee wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & iskaashiga Caalamiga ah ee Dawladda Waqooyi Bari Mudane Osman Aden Hussen ayaa maanta Muqdisho kaga qaybgalay Munaasabadda daahfurka Qaab-dhismeedka Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta (National NTP-M&E Framework) iyo Nidaamka Danabaysan ee Kormeerka iyo Qiimaynta (e-NIMIS) ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka 2025–2029.

Munaasabadda waxaa ka qayb galay isna Agaasimaga waaxda Qorshaynta mudane Mohamed Apdurahmaan Ruush.

Masuuliyiin ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad-Goboleedyada, hay'adaha caalamiga ah, hay'adaha aan dowliga ahayn iyo bulshada rayidka ah ayaa iyana Qayb ka ahaa Munaasabadda.



WASAARADDA QORSHAYNTA & OCHA SOMALIA

Muqdisho: 8, September, 2026:- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Waqooyi Bari, Mudane Osman Aden Hussen oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta, ayaa xafiiska OCHA Soomaaliya ee Muqdisho kulan muhiim ah kula qaatay Madaxa Xafiiska OCHA Mr. Crispen Rukasha iyo OCHA ABC FOCAL POINT SOMALIA Tandiwe Ngwenya.

DHAMMAAD MA AHA!

Laba sano ayaa laga soo gudbay maalintii safarkani bilaabmay, balse hawshu weli way socotaa, himiladuna way sii fogaanaysaa.

Labadan sano waxay ahaayeen waqti ay ku duugan yihiin masuuliyad, dadaal, waayo-aragnimo, caqabado, guulo iyo xusuuso aan sahal ku tirmayn. Waxay ahaayeen laba sano oo shaqo iyo qorshe lagu dhisay, waayo-aragnimo lagu kasbaday, laguna sameeyey raad ka mid noqonaya taariikhda Wasaaradda Qorshaynta.

Buuggani waxa uu soo koobayaa qayb ka mid ah raadkii muddadaas—shaqadii la qabtay, warbixinnadii la diyaariyey, dhacdooyinkii la diiwaangeliyey iyo xusuustii ka dhalatay hawl maalmeedka Xafiiska Agaasimaha Guud.

Laakiin dhammaadka buuggani ma aha dhammaadka safarka.

Waa bog la xidhayo si bog cusub loo furo.
Waa xusuus la kaydinayo si mustaqbalka loo majeerto.
Waa raad la reebayo si jiilalka dambe ay u ogaadaan halka laga soo bilaabay.



Warbixinta Waxqabadka Xafiiska Agaasimaha Guud 2024– 2026
2024-2026 Office of the Director General Performance Report

“Maanta oo ay taariikhdu tahay 22-ka Sebtembar 2026, waxa ay ku beegan tahay laba sano oo buuxa laga soo bilaabo maalintii ugu horreysay ee aan ka shaqo bilownay Wasaaradda Qorshaynta. Waa laba sano oo ay ku duugan yihiin waayo-aragnimo, hawl, dadaal, caqabado, guulo, qorshayaal iyo xusuuso badan oo ka mid ah socdaalkii hay’adeed ee Wasaaradda.

Buuggani waxa uu soo koobayaa labadaas sano ee shaqada, hawlaha, warbixinnada, qorshayaasha iyo dhacdooyinkii muhiimka ahaa ee ka soo baxay xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Horumarinta & Iskaashiga Caalamiga ah.”

SSC-Khaatumo - ilaa- Waqooyi Bari

22

September 2026

Website: mopdic-ne.so | Social media: — @MoPDIC